

## Ogolaanshiyaha inaad Ka Qayb Qaadato Cilmi Baadhista

Waxaa lagaa dalbaday inaad ka qayb gasho daraasada cilmi baadhista. Inta aanad ogolaan, waa in lagu siiyaa macluumaad kooban oo ku saabsan daraasada cilmi baadhista. Soo koobiddani waxay ka koobnaanaysaa macluumaadka ugu muhiimsan ee kaa caawinaya inaad fahanto sababaha ay tahay inaad ama inaanad ugu biirin daraasaddan.

Inta aanad ogolaan, baadhuhu waa inuu kuu sheegaa:

- (i) Ujeeddada, habka, iyo inta ay qaadanayso cilmi baadhistu;
- (ii) Haddii ay jiraan nidaamyo u baahan in la hubiyo;
- (iii) Khatar kasta oo la filan karo, raaxo la'aan iyo faa'idooyinka cilmi baadhista;
- (iv) Haddii ay jiraan nidaamyo faa'ido leh oo kale oo la raaci karo ama gunooyin kale;
- (v) sida loo ilaalinayo sirta macluumaadka; iyo
- (iv) Cida lagala xidhiidhayo su'aalaha, cabashooyinka iyo dhaawacyadaba.

Haday munaasan tahay, baadhaha waa inuu kuu sheegaa:

- (i) Hadday jiraan magdhaw ama daawayn caafimaad haddii uu dhaawac ku soo gaadho;
- (i) Suurtagalnimada khataraha aan la arkayn;
- (iii) Xaaladaha uu daraasada hakin karo ka qayb qaadashadaada;
- (iv) wixii kharashaad dheeraad ee laguugu darayo;
- (v) waxa kugu dhacaya haddii aad joojiso inaad ka qayb qaadato;
- (vi) Marka ay tahay in lagu sheegayo waxyaabaha cusub ee la helay kuwaas oo saamayn kara rabitaankaaga ka qayb qaadashada;
- (vii) Inta qof ee ku jiri doona cilmi baadhista; iyo
- (viii) Sida aad loo baahan tahay inaad u ogolaato macluumaadkaaga caafimaadka ee daraasadda.

Ka qayb qaadashadaada cilmi baadhista waa mutadawacnimo, sidoo kalena lagugu ma ciqaabayso ama ku waayaysid wax faa'ido haddii aad diido inaad ka qayb qaadato ama aad go'aansato inaad joojiso. Inaad saxeeexo dukumentigan waxay ka dhigan tahay, inaad daraasadda cilmi baadhista, oo ay ku jirto macluumaadka sare, in afka lagaaga sharraxay, iyo inaad ikhtiyaarkaas u ogolaatay inaad ka qayb qaadato. Haddii aad ogolaato inaad ka qayb qaadato, waa in lagu siiyaa koobi saxeeexo oo dukumentigan ah iyo soo koobid qoran oo cilmi baadhista ah oo Ingiriisi ku qoran.

### Su'aalaha?

Haddaad hayso su'aalo, cabashooyin, dhaawacyo ama walaacyo ku saabsan daraasaddan, waxaad la xidhiidhi kartaa baadhaha adigoo isticmaalaya nambarka tilifoonka ee ku qoran koobidda daraasadda. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan xuuqdaada ka qayb-gale ahaan, ama haddii aad hayso su'aalo, cabashooyin ama walaacyo oo aad u malaynayso inaad kala hadli karto baadhaha, fadlan la soo xidhiidh Boodhka Dib U eegista Qawaaniinta adigoo isticmaalaya nambarka tilifoonka ama ciwaanka iimaylka ku qoran koobidda daraasaddan.

\_\_\_\_\_  
Magaca Ka Qayb Galaha

\_\_\_\_\_  
Saxeexa Ka Qayb Galaha

\_\_\_\_\_  
Taariikhda

Waxaan xaqiijinayaa inaan u joogay turjumaan ahaan intii lagu guda jiray habka heshiiska ee daraasadda cilmi baadhista. Waxaan xaqiijinayaa inaan ahay khabiir leh xirfadaha lagama maarmaanka ah si aan wax ugu kala turjumo luuqadda ka soo qayb galayaasha iyo Ingiriisida. Inaad foomkan saxeexo, Waxaan xaqiijinayaa inaan soo bandhigay adeeg turjumaan oo dhammaystiran oo aan isku bedelayo cilmi baadhaha helaya ogolaanshiyaha iyo ka qayb galaha, sida ugu wanaagsan ee awoodayda ah.

\_\_\_\_\_  
Magaca Turjumaanka

\_\_\_\_\_  
Saxeexa Turjumaanka

\_\_\_\_\_  
Taariikhda